

SALAADDA JIMCAHA

"Maalinta Barakada

iyo

Isu-soo-dhowaanshaha"



by: Mohamedshugri Nour

© Mohamedshugri Nour
2024

SALAADDA JIMCAHA

Salaadda Jimcaha waa waajib (fardu cayn) ku ah qof kasta oo Muslim ah, qaangaar ah, caqli qaba, xor ah (aan addoon ahayn), oo degan magaalo ama tuulo salaadda Jimcaha laga tukanayo. Waxaa laga reebay waajibaadka salaadda Jimcaha dadka soo socda:

- **Dumarka:** Salaadda Jimcaha ku waajib ma'aha, laakiin waxaa u bannaan inay yimaaddaan masjidka haddii ay doonayaan, iyada oo la raacayo xeerarka asturnaanta.
- **Carruurta:** Waa kuwa aan qaangaarin.
- **Culayska Xanuunka ama Safarka:** Qofka buka ama midka safar ku maqan waxaa la dhaafay waajibka, laakiin hadduu masjidka

yimaado waa inuu tukadaa.

- Addoomada: Haddii qof uu yahay addoon, sidoo kale lagama doonayo inuu tukado.

Dadka waajibka ay ku tahay ayaa la faray inay u diyaar garoobaan salaadda Jimcaha, si ay uga qeyb qaataan salaadda iyo khudbada, taasoo muhiim ah in la maqlo.

Magaalo aan magaaladaada ahayn.

Haddii aad deggan tahay magaalo aan ahayn tii aad asal ahaan ka soo jeeday, waxaana ku qaadanaysaa wax ka badan afar maalmood oo joogis ah, culimada badankood waxay qabaan in aad u tixgelinayso naftaada qof deggan (muqim ku ah) magaaladaas. Sidaas darteed, salaadda Jimcaha ayaa kugu waajibaysa. Waa haddii aad buuxisay shuruudaha kale ee waajibka salaadda Jimcaha.

Haddii aad joogtid magaaladaada hooyo oo ay dhacdo (la tukado) salaadda Jimcaha, balse aad si ula kac ah uga tagto adigoo aan lahayn cudurdaar sharci ah, waa dembi dushaydaada saaran. Salaadda Jimcaha waa waajib, waxaana ka tegitaankeeda la mid tahay qof salaad kale oo waajib ah ka tagay.

Si kastaba ha ahaatee, haddii aad leedahay cudurdaar sax ah, sida:

- ✓ Xanuun ama xaalad caafimaad oo kaa hor istaagaysa inaad tagto.
- ✓ Cimilada oo aad u xun, sida roob culus ama khatar kale oo

safarka(wadada) lagu wajihi karo.

- ✓ Mas'uuliyad adag oo lama huraan ah, sida inaad ilaalinayso qof buka ama xaalad kale oo muhiim ah.

Markaa waa lagaa dhaafayaa waajibka ah inaad tagto salaadda Jimcaha, laakiin waa inaad tukataa salaadda duhur.

Muhiim

Waxaa muhiim ah inaad niyaddaada saxdo oo aad ka feejignaato inaad iska dhaafin camalka waajibka ah iyadoon cudurdaar sharci ah jirin.

Daliilka inay tahay waajib

Daliilka in salaadda Jimcaha ay tahay waajib iyo in qofka si ula kac ah uga taga uu dembi weyn galay waxaa laga helayaa Qur'aanka, Sunnada Nabiga (NNKH), iyo ijmaaca culimada.

1. Qur'aanka

Allaah wuxuu yiri:

"يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذَا ثَوَدَيَ لِلصَّلَاةِ مِنْ يَوْمِ الْجُمُعَةِ فَاسْعَوْا إِلَى ذِكْرِ اللَّهِ وَذَرُوا الْبَيْعَ ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِنْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ"

"Kuwa xaqa rumeeyow! Marka salaadda Jimcaha la idiinku yeero maalinta Jimcaha, u degdega xusidda Allaah oo ka taga ganacsiga; taasaa idiin kheyir badan haddaad wax ogtihiin."

Aayaddan waxay muujinaysaa in salaadda Jimcaha yeeriddeda ay tahay waajib culus oo aan la dayici karin.

"U degdega xusidda Allaah" waa ammar, halka ammaradu ay waajib yihiin haddii aan daliil kale oo ka reebaya jirin.

2. Xadiiska Nabiga (NNKH)

Nabigu (NNKH) wuxuu yiri:

"مَنْ تَرَكَ ثَلَاثَ جُمُعٍ تَهَاوُتًا، طَبَعَ اللَّهُ عَلَى قَلْبِهِ".

— (Sunan Abi Dawood, 1052)

Macnaha xadiiskan waa in qofka si fudud uga taga salaadda Jimcaha saddex jeer (3 jimco) isaga oo aan lahayn cudurdaar sharci ah, uu Alle qalbigiisa daboolayo, taas oo ah calaamad muujinaysa in qalbigiisu qalalay oo xaq ka leexday.

Xadiiskan wuxuu caddeynayaa in qofka aan cudurdaar lahayn ee si joogto ah uga tago Jimcaha uu dembi weyn sameyay, qalbigiisuna uu qalalayo (qalbi madoobaad).

3. Ijmaaca Culimada

Culimada Islaamka dhammaantood (ijmaac) waxay isku waafaqeen in salaadda Jimcaha ay tahay waajib culus (fardu cayn) qof kasta oo Muslim ah, haddii shuruudaha waajibka la buuxiyo. Waxa laga reebay oo kaliya dadka uu sharcigu fasaxay, sida dumarka, carruurta, bukaanka, ama kuwa

safarka ku jira.

Xukunka Ka Tagista Salaadda Jimcaha

Haddii qofka ay waajib ku tahay salaadda Jimcaha, uu si ula kac ah uga tago, wuxuu ku dhacayaa dembi weyn, waana ka mid noqoshada kuwa dayacay waajibaadka Alle uu leeyahay.

Tani waa mid ka dhigaysa in qofka laga doonayo inuu toobad keeno oo uu ku soo laabto salaaddiisa waajibka ah.

Daliilladan ayaa caddeynaya in qofka si ula kac ah uga taga salaadda Jimcaha uu dembi galo, haddii uusan lahayn cudurdaar sharci ah.

Halkan waxaan kuugu soo gudbinayaa adaabta lagaaga baahan yahay inaad ku dhaqanto salaada Jimcaha ka hor iyo imaanshahaaga masjidka(inta lagu guda jiro masjidka) iyo salaada Jimcaha ka dib.

Waxaa muhiim ah in aad ogaato in salaadda Jimcaha ay tahay camal weyn oo muhiim ah, waxaana jira dhowr arrimood oo lagaa doonayo inaad sameyso ka hor intaadan misaajidka aadin iyo markaad tagto, si aad u heshid ajar buuxa iyo ka qeybgal wanaagsan.

"Ka Hor Inta Aanad Misaajidka Aadin"

■ Maydhashada (qusliga):

Nabigu (NNKH) wuxuu yiri:

"غَسْلُ يَوْمِ الْجُمُعَةِ وَاجِبٌ عَلَى كُلِّ مُحْتَلِمٍ"

("Maydhashada maalinta Jimcaha waa waajib ayay ku tahay qof kasta oo qaangaar ah.")

— (Sahih Bukhari, 879; Sahih Muslim, 846)

Qusliga waa sunno xooggan oo qofka u diyaarinaysa salaadda Jimcaha. Waxaa habboon inaad si fiican u qabaysato oo jirkaaga aad u carfiso si wanaagsan.

■ Dhar Nadiif Ah:

Xiro dharkaaga ugu fiican ee nadiifka ah, maadaama Jimcaha uu yahay maalin gaar ah oo sharaf leh uuna yahay ciidda isbuuca.

■ Cadayashada Ilkaha (Siwaak):

Waa sunno inuu nadiif yahay afkaaga.

■ Qur'aanku wuxuu na farayaa in marka la addimo Jimcaha, aan degdegno, sida aan horay kusoo sheegayba:

"يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذَا تَوَدَّيَ لِلصَّلَاةِ مِنْ يَوْمِ الْجُمُعَةِ فَاسْعَوْا إِلَى ذِكْرِ اللَّهِ وَذَرُوا الْبَيْعَ"

("Kuwa xaq a rumeeyow! Marka salaadda Jimcaha la iddinku yeero maalinta Jimcaha, u degdega xusidda Allaah oo ka taga ganacsiga.")

— [Suuradda Al-Jumu'ah: 62:9]

5. Ka Tag Ganacsiga iyo Howlaha Adduunka:

Waa inaad joojisaa dhammaan hawlaha kale ee ku mashquulinaya, sida shaqada, si aad diiradda u saartid salaadda.

Markaad Tagto Misaajidka

● Salaanta Masjidka:

Marka aad masjidka gasho, tuko labo rakcaddood oo salaanta masjidka ah (Tahiyatul Masjid), xitaa haddii imaamka khudbada bilaabay. Nabigu (NNKH) wuxuu yiri:

"إِذَا جَاءَ أَحَدُكُمْ الْمَسْجِدَ، وَالْإِمَامُ يَخْطُبُ، فَلْيُصَلِّ رَكْعَتَيْنِ، وَلْيَتَجَوَّزْ فِيهِمَا"

("Haddii midkiin yimaado masjidka Jimcaha oo imaamka khudbad wada, ha tukado labo rakcaddood oo sahlan(ha soo gaabiyo).")

— (Sahih Bukhari, 930; Sahih Muslim, 875)

- Safka Hore Raadinta:

Qof kasta waa inuu isku dayaa inuu ku tukado safka ugu horeeya, maadaama uu yahay midka ugu fadliga badan.

- Dhegeysiga Kudbada:

Inta khudbadda lagu jiro waa inaad aamustaa oo dhagaysataa, iyadoo aanad la hadlin qof kale. Nabigu (NNKH) wuxuu yiri:

"إِذَا قُلْتَ لِصَاحِبِكَ يَوْمَ الْجُمُعَةِ أَنْصِتْ وَالْإِمَامُ مَخْطُبٌ، فَقَدْ لُعِنْتَ"

("Haddii aad qof ku dhahdo 'aamus' khudbadda inta lagu jiro, waad ku gafaysaa.") (Yacni ajirkaaga ayaa kaa nusqaamaya ama aad ku waayaysaa)

— (Sahih Bukhari, 934; Sahih Muslim, 851)

- Duco Weydiisashada:

Jimcaha waxaa ku jira saacad ducada la aqballo. Nabigu (NNKH) wuxuu

yiri:

"فِيهِ سَاعَةٌ لَا يُوَافِقُهَا عَبْدٌ مُسْلِمٌ وَهُوَ قَائِمٌ يُصَلِّي يَسْأَلُ اللَّهَ شَيْئًا إِلَّا أُعْطَاهُ إِلَيْهَا"

("Jimcaha waxaa ku jirta saacad, haddii addoon Muslim ah isagoo salaadda ku jira uu Alle wax weydiisto, wuu siinayaa.")

— (Sahih Bukhari, 935; Sahih Muslim, 852)

Kadib Salaadda Jimcaha

○ Ku Mashquulidda Xuska Alle:

Wagtiga ka dambeeya salaadda Jimcaha waa fursad fiican oo aad ku akhrisato Qur'aan ama aad ku xusto Alle (adkaar).

○ Ka Fogaanshaha Hadallo ama Ficillo Wanaagga Kaa Hor Istaaga:

Waa inaad iska ilaalisaa ficillada ama sheekooyinka laga yaabo inay baabi'iyaan ajarka Jimcaha, sida sheekaysiga aan muhiimka ahayn ee danbiga uun kaa soo gaadhayo.

Habdhaqankan oo aad raacdo wuxuu kaa caawinayaa inaad u gudatto salaadda Jimcaha si wanaagsan, iyadoo aad helayso ajar iyo fadli badan insha Allah.

» » » *Ku socoto khadiibka(midka khudbada akhriya)*

Rasuulka (ﷺ) wuxuu inoo sheegay in khudbada gaaban ay ka kheyr badan tahay midda dheer:

إِنَّ طَوْلَ صَلَاةِ الرَّجُلِ وَقَصَرَ خُطْبَتِهِ مِئْتَةٌ مِنْ فَقْهِهِ، فَأُطِيلُوا الصَّلَاةَ وَأَقْصِرُوا الْخُطْبَةَ

("Salaadda oo la dheereeyo iyo khudbada oo la gaabiyo waxay muujinaysaa fahanka fiican ee diinta")

Dardaaran

Talooyin iyo Habdhaqan U Fududaynaya Qofka Inuu Si Joogto Ah U Tukado Salaadda Jimcaha

Salaadda Jimcaha waa waajib muhiim ah oo aan la dhaafi karin, waxaana muhiim ah in qofka Muslimka ah uu fahmo sida uu u samayn karo dadaal joogto ah si uu u tukado salaadda Jimcaha, isagoo ka fogaanaya dayacaadda. Qaybtan, waxaan ku bixin doonaa talooyin iyo habdhaqan si loogu fududeeyo qofka inuu si habsami leh u tuko salaadda Jimcaha.

▪ Qorshee Waqtiga Jimcaha

Waxaa muhiim ah in qofku uu qorsheeyo waqtiga maalinta Jimcaha. Tani

waxay ka dhigan tahay in qofku uu diyaar u ahaado inuu tuko salaadda Jimcaha si aan carqalad u soo gelin noloshiisa. Si tan loo sameeyo:

U samee jadwal: Ku dar salaadda Jimcaha qayb ka mid ah jadwalkaaga usbuuca. Hubi inaad ka soo kiciso waqtiga salaadda si aad uga qayb gasho khudbada iyo salaadda.

Ka fogow hawlaha waqtiga qaata: Iska ilaali hawlaha badan ee waqtigaaga qaata maalinta Jimcaha, gaar ahaan subaxdii. Ugu horeyn, u dhig salaadda sidii mudnaanta ugu weyn ee maalintaada.

▪ Is Diyaari Si Maskaxdaada Ugu Fududaato

Sidaan hore u sheegnay, salaadda Jimcaha waxay ka koobantahay salaad iyo khudbo, markaa waxaa muhiim ah inaad maskaxdaada u diyaariso si aad uga faa'ideysato waayo-aragnimada buuxda. Talooyin ku saabsan is-diyaarinta:

Ku dadaal xusuusta diinta: Iska ilaali in aad ku mashquusho hawlaha kale oo ku dadaal inaad maalin kasta akhrido Qur'aanka ama xadiithyada si maskaxdaada diintu ugu xoogga raagto.

Diyaari dharkaaga: Haddii aad ku shaqeyso meel aan ku habboonayn inaad si dhaqso ah uga soo tagto, diyaarso dharkaaga iyo qalabka salaadda si aad waqtiga ugu badan uga faa'ideysato.

▪ Ku Dadaal Ka Qaybgalka Khudbada Jimcaha

Khudbada Jimcaha waxay muhiimad weyn u leedahay fahamka diinta iyo xusuusta Alle. Si aad uga faa'ideysato khudbada:

Ka qeyb gal khudbada: Iska ilaali inaad iska tagto khudbada, maadaama ay tahay fursad weyn oo lagu barto waxyaabo cusub oo ka tirsan diinta. U fiirso khudbada si maskaxdaada looga saaro waxyaabaha adiga kugu mashquuliya.

Ka fikir wacyiga khudbada: Kadib khudbada, isku day inaad ka fikirto fariimaha ku saabsan diinta ee lagu sheegay, gaar ahaan kuwa la xiriira muhimadda wada-jirka iyo cibaadada.

▪ Kudar Salaadda Jimcaha Waa Wax Caado Ah

Qofka si joogto ah u tukada salaadda Jimcaha wuxuu noqonayaa mid u jeeda xasuusta Alle. Si aad salaadda ugu dhaqan geliso caado, samee:

Ku dadaal joogteynta: Iska ilaali inaad u fasaxdo sabab kasta oo kugu keeni karta inaad salaadda Jimcaha ka gaabsato. Isku day inaad noqoto qof diyaar ah oo maalin kasta ku qaybgala salaadda Jimcaha.

Ka dhig caado: Wax walba oo aad caado u yeelato waxay noqonayaan qayb ka mid ah nolol maalmeedkaaga. Ku dadaal inaad si isdaba joog ah u tukato, taas oo ka dhigaysa mid aan laga laaban.

THE END